

Nagala soo xidhiidh

Su'aalaha Deg dega ha ama Tabashooyinka Telefoon kalkaaliye Caafimaad
651-229-3890

Su'aalihii kale ee Ku Saabsan Daryeelkaaga
Bukaanada Rugta Caafimaadka St. Paul:

Khad Wicitaanka
Kalkaalisada
651-578-5000

Bukaanada jooga Goobaha Kale:

La xidhiidh xubin ka tirsan kooxda daryeelka caafimaadkaaga Gillette.

Balamaha
651-290-8707

Daawo Fiidhyahayaga



www.gillettechildrens.org/EDR106

Buggaag, Cajalado Maqal iyo Muuqaal ah iyo Waxyaalo badan

Raadi qalabka ku saabsan naafada, xaaladaha daawooyinka iyo taageerada daryeel-bixiyayaasha.

Qaniimaad Caafimaad iyo Waxbarasho

St. Paul campus, wuxuu u dhaw yahay dabaqa afaraad skyway
651-229-3938
hre@gillettechildrens.com

Tuubada Caloosha (G-tube) Tilmaamaha Xaalada Degdegga

Waxbarasho bukaan
EDR106

Waxaad u baahan doontaa inaad isticmaasho macluumaadkan haddii tuubadaada quudinta lagu dhaadhiciyo (g-tube) ay kaa soo baxdo.

Haddii calool furanku

ka yar yahay laba toddobaad jir:

1. Goos ku dul xidh caloosha furan.
2. Aad qolka xaaladda degdegga. Ha sugin
3. Ka wac Waaxda Qalliinka Carruurta (612-626-4214).

Haddii calool furistu u dhaxeeyaan laba toddobaad iyo sideed toddobaad jir

1. Isticmaal agabka tuubada caloosha lagu dhaadhiciyo xaaladda degdegga
2. Ka wac Waaxda Qalliinka Carruurta (612-626-4214).
3. Aad qolka xaaladda degdegga.

** waa inaad aaddo qolka xaaladda degdegga 1 illa 2 saacadood gudahood marka tuubada calooshu uu soo baxo. Haddii kale, furanka ayaa bilaabi doona si uu isku xidho.

Haddii furanka calooshu uu ka badan yahay Sideed toddobaad jir:

Haddii aan lagugu tusin rugta caafimaad sida loo badalo tuubada caloosha:

1. Isticmaal agabka tuubada caloosha. Xaalada deg dega
2. Aad qolka xaaladda degdegga
3. Ka wac Waaxda Qalliinka Carruurta (612-626-4214).

Haddii lagugu tusay rugta caafimaadka sida loo badalo tuubada caloosha raac tilmaamayaashan:

- Haddii bilbiilku aanu dilaacin gali tuubo isku mida ah.
- Haddii bilbiilku dilaacay, gali tuubo Mic-Key cusub.

** Had iyo jeer hayso badhan Mic-Key cusub dheeraada iyo/ama xidhmo agabka tunbada xaaladda degdegga.

Xidhmo agabka tuubada Caloosha Xaaladda degdegga

Waxaanu kuu diri doonaa guri alaab leh oo aad u baahan doonto haddii tuubada caloosha si kadis ah ay uga soo baxdo caloosha. Xidhmada agabkaaga tuubada Caloosha Xaalada deg dega ayaa ka koobnaan doonta waxyaalaha soo socda:

- Dhuuje ka samaysan Silicon Foley oo leh dhumuc ugu yaran laba jeer qiyaas ahaan ka yar (Miisaan Faransiis) tuubada caloosha hadda.
- Ku gufee halka ay ku dhammaato dhuujaha Foley
- Laba 5 mili oo siliinj leh milix neef ka buuxi bilbiile dul yaal dhuuje silicon Foley
- Biyo ku milmi kara kareemo si loo saliideeyo dhuuje Foley
- Qidcad yar oo microfoam sharooto ah, 1” by 6”

Galitaan tuubada Caloosha Xaaladda degdegga

1. Maydh gacmaha.
2. Ku maydh jiidda caloosha maro qoyan.
3. Fur baqshadda dhuujaha Foley oo saliidee caarada bilbiilaha ee kaadi dhuuje .
4. Gali kaadi dhuuje ku cadaadi qaybta danbe ee weyn dhuujaha Foley. Daloolka ayaa ka ilaalin doona waxyaalaha caloosha ku jira inay liigaan ka dib marka dhuujaha Foley la xuluuliyo.
5. Ku xaji dhuujaha Foley caloosha si aan qalooc ku jirin.
6. Si taxadar leh u xuluuli dhuujaha Foley illaa xagga caloosha furan. MARNABA XOOG HA U ADEEGSAN TUUBADA. Dhuujaha Foley waxaa habBoon inuu galo furanka caloosha ugu yaraan dherarka tuubada-caloosha hore. Raadi waxyaalaha ay ka kooban tahay calooshu adiga oo ka qalajinaya kaadi dhuujaha Foley. Arrintan waxay timaamaysaa in dhuujaha Foley uu ku jiro caloosha.

Usii gudub bogga kale.

7. Isticmaal bilbiille leh kaag si neef looga buuxsho bilbiile leh siriinj biyo milix caadi leh oo hore looga buuxiyey. Tani waa inaan xanuun yeelan.
8. Si taxadar leh u soo dhufo dhuujaha Foley illa ay jirto iska caabi.
9. Ku duub sharootada agagaarka dhuujaha Foley dhawr jeer qiyaas ahaan $\frac{1}{4}$ iinj ka billaabanta caloosha. Tani waxay ka hortagaysaa dhuujaha in dib looga soo dhufto caloosha.
10. Ka wac Waaxda Qalliinka Carruurta (612-626-4214) tilmaame dheeraada.